# Ilaha Macluumaadka Qoyska

*Xogta hoose waxay kaa caawin doontaa inaad adiga iyo cunuggaaga idin ku xiriirisaan waxbarashada muhiimka ah ee sannad dugsiyeedkan.*

***Waxaa naga go'an mustaqbal ifaya ubadkaaga!***



## Qalabka Isgaarsiinta Dijitalka ah si loo Taageero Waxbarashada Iskuulaadka Dowladda ee Federal Way

### Kaanvaska

***Canvas waa Nidaamka Maareynta Waxbarashada (LMS) oo ardayda iyo waalidiinta siiya fursad ay ku helaan barashada dhijitaalka ah, jadwalka toddobaadlaha ee fasalka, iyo waxyaabo kale oo badan.***

Si aad uhesho Canvas, aad FWPS Launchpad to Learning ***https://learn.fwps.org***. Magaca ardaygaagu waa Aqoonsigooda Ardayga, iyo koodhkiisa si la mid ah sida loo isticmaalo in lagu galo kombuyuutarrada dugsiga.

### Wicitaanka Telfoonaadka

Macalimiinta ayaa kula soo xiriiri kara ayagoo adeegsanaaya nidaamka wicitaanka. Waxaa laga yaabaa inaad ogaato in lambarku kasoo muuqdo koodhka aag ka duwan aageena juquraafiga.

### Qoraal

***Shaqaalaha fariin qoraalka u diraaya waalidiinta iyo ardayda***

Agabka isgaarsiinta ayay u adeegsadaan shaqaalaha sida macallimiinta in ay kula xiriiraan waalidiinta iimayl, fariin qoraal iyo cod halka ardayda ay kula xiriiraan iimeel. Fariin qoraalka ayay heli karaan ardayda da'aha 13 iyo ka wayn. Ardayda iyo waalidiinta ayaa si otomaatig ah u doorta. Wixii xog dheeraad ah iyo sida looga baxo dookha, booqo ***www.fwps.org***.

***Iskuul iyo degmo qoraal ah oo balaaran waalidiinta:***

Qoraalka waxaa kaloo lagaheli karaa iskuulka canugaaga iyo degmada iskuulka. Macluumaad dheeri ah waxaa laga heli karaa halkan: ***www.fwps.org/parentnotification***.

### Zoom Meetings

Qoysaska qaarkood, shirarka fiidiyow ahaanta loo qabto ayaa u noqon doona sida ugu wanaagsan ee loola xiriiro macalinka ilmaha. Macallinka ilmahaaga ayaa kuu soo diri kara casuumaad inaad kaqeyb gasho Zoom oo ah bar-kulan muuqaal ah. Si aad uga qayb gasho kulankaan adigoo adeegsanayya kombuyuutarka, dhagsii xiriiriyaha/lifaaqa laguugu casuumay. Si aad kulankan ugala xiriirto taleefanka, waxaad soo wici kartaa lambarka la siiyay ama kala soo bixi kartaa barnaamijka moobiilka ee Zoom at ***https://www.zoom.us/download***.

### Miyaad ogtahay in shabakadeena eey leedahay turjumaada luuqadaheena ugu waawayn?

In lagu beddelo luqadda websaydhka FWPS:

- Booqo ***www.fwps.org***
- Guji 'Translation' ee ku taal dhinaca midig ee sare bogga
- Ka dooro luqadda aad doorbideyso menu-ka hoose

### Ilmahaagu (carruurtaadu) ma u baahan yihiin inay galaan kombuyuutar si ay guryahooda ugu helaan waxbarashadooda?

Fadlan muuji baahiyaha marin u helka teknolojiyada canuggaaga inta lagu gudajiro nidaamka diiwaangelinta onlaynka ah. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad ubaahantahay caawimaad, la xiriir iskuulka cunugaaga.

**WIXII XOG DHEERAAD AH**

**MuuqaalLAda qaabka loo sameeyo iyo khayraadka ayaa laga heli karaa webseedkeena oo ah www.fwps.org**


**FEDERAL WAY**
PUBLIC SCHOOLS

FW School District #210
33330 8th Avenue South
Federal Way, WA 98003



NONPROFIT ORG.
US POSTAGE
PAID
Federal Way, WA
Permit No. 54



BAYAANKA TAKOORID LA AANTA IYO SI SIMAN U FURSAD SHAQO USIINTA Dugsiyadda dadweynaha ee FEDERAL WAY Qofna kama takoorto barnaamiyada iyo howlaha ayadoo u eegeyso Jinsiyad, midab , dalka qofku kayimid ama isir, diin ,caqiido, jinsi,ciduu jecelyahay lamacaamilkeeda ragn iyo dumar jinsi ahaan,muujinta jinsiga, dadiisa,xaaladiisa guur ama qoys, halgan ama military, curyaanimo or isticmaalka Ey tabaran ama xayawaan adeega ah. Dagmada waxay siisaa fursad iskumid ah dhamaan dhalinyarada hadday katirsanyihiin '' boy scout of America'' iyo haddii kale.Macluumaadkani ku jira buug-yarahaan waa hadda waqtigii la daabacay. Federaalka, dowlada iyo sharciyadda deegaanka saameyn ayay ku yeelan karaan wargelinadda qorshooyinka degmadda iyo hannaankooda, iyo caddaka ugu dambeeyay ee hadda ah waxaa laga heli karaa **www.fwps.org**


## ParentVUE

**ParentVUE** waa jidkaaga ee aad ku hubiso buundooyinka cunugaaga, xaadiritaanka iyo la xiriirida macallinka cunuggaaga. Si aad u gasho ParentVUE booqo ***https://grades.fwps.org***.

***Waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah, waxaad hubisaa in macluumaadkaaga xidhiidhkaagu yahay mid joogto ah!***

Si aad uga hesho xiriirinta degmada, dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga, waxaa muhiim ah in macluumaadkaaga xiriirka ee ku jira koontadaada ParentsVUE uu yahay mid casriyeysan.

*Waad casriyeeyn kartaa adigoo booqanaayo* ***https://grades.fwps.org***.

Haddii aadan firfircoonayn koontadaada 'ParentVUE', fadlan la xiriir dugsiga cunuggaaga. Si aad u hesho farriimaha codka hubinta inaad gashey taleefanka gacanta ama guriga oo aad dooratay nooca u dhigma.

ParentVUE waxay u oggolaaneysaa wada-xiriirka labada dhinac ee u dhexeeya macallimiinta iyo waalidiinta oo ku kala baxa luqado badan. Si aad u hesho farriimo ku qoran luqad aan ahayn Ingiriisiga, fadlan ka dooro luuqadda aad doorbideyso bogga soo-gelitaanka ee ParentVUE ama barnaamijka moobiilka.

Marka cunugaada macalinkiisa u diro farriin dhanka parentVUE, waxaad heli doontaa emayl ku jira fariinta. Si aad uga jawaabto farriintan, waa inaad gashid koontadaada ParentVUE. (Ha uga jawaabin noreply@fwps.org ogeysiiska emaylka.)

Hadii aad u baahantahay caawimaad ParentVUE booqo ***https://www.fwps.org/families*** ama emayl ***grades@fwps.org***.

## Xariirka Waalidka

**Xariirka Waalidku** waa meesha aad ka heli karto dhammaan baahiyada la xidhiidha waxbarashadda ubadkaaga! Booqo ***www.fwps.org/families*** si aad u hesho su'aalaha badanaa la iswaydiiyo, lifaaqa ilaha macluumaadka guud, "Sida loo" fiidiyowyada la xiriira ilaha macluumaadka dhijitaalka ah, iyo inbadan.

## Launchpad to Learning

Hal-ku-dhigga internet-ka wuxuu siinayaa marin u helitaanka dhammaan codsiyada dugsiga iyo ilaha waxbarashada

*Kabaar:* ***https://learn.fwps.org***.




Macluumaadkani ku jira buug-yarahaan waa hadda waqtigii la daabacay. Federaalka, dowlada iyo sharciyadda deegaanka saameyn ayay ku yeelan karaan wargelinadda qorshooyinka degmadda iyo hannaankooda, iyo caddaka ugu dambeeyay ee hadda ah waxaa laga heli karaa **www.fwps.org**.



LUULYO 2023




# Soo dhawow!!

**FASALKA 7**

## *Hagaha Iskaashiga Waxbarashada*



**HADAFYADEENA QORSHAHOODA**

**1.** SANADAHA HORE: **Dhisidda aasaaska**

**2.** ILMAHA OO DHAN: **Guuleysi, kalsooni, shaqsiyaad masuul ah**

**3.** ARDAYDA FIRFIRCOON: **Mashquulin, xoojin fekerayaasha qatarta ah**

**4.** AAGGA -KA KOOBAN KARTI DA: **Ku sareynta dhammaan maadooyinka**

**5.** KU DHEGNAASHADA IN UU QALIN JABIYO: **Qallin jebinta dugsiga sare ee si kala guur guul badan**

**Fasalka todobaad waa waqti ugu xiiso badan ilmahaaga.** Ilmahaaga wuxuu ka korayaa waxbaraho iyo bulsho ahaanba. Hagahaanni wuxuu bixinayaa aragti guud ee caadi ahaanta waxbarasho iyo qorsheynta dareen-bulsho ee ilmahaaga uu la kulmi doono sannadkaan. Caadi ahaanta waaxbarsho waa muhiim maxaa yeelay waxay caawinaan xaqiijinta ee dhammaan ardayda, waxba maahin halka ay ku nool yihiin, waxaa loo diyaariyay guul. Ilmahaaga wuxuu si aad ah u fahmayaa fikiradaha isku dhex jira. Hagahaan waxaa loola jeedaa inuu ku taageero fahamka wax uu ilmahaaga baranaayo iyo qaababka aad kula hadli kartomacallinka ilmahaaga. Isticmaal hagahaan si uu kuu caawino la hadalka ilmahaaga macallinkiisa arrimaha ku saabsan horumarka iyo koboca sannadka.

**FEDERAL WAY**
PUBLIC SCHOOLS

FWPS.ORG

***ARDAY KASTA: CODKA. RIYO. MUSTAQBAL WANAAGSAN.***

# FASALKA 7 HAGGE KU SOCODA *guusha ardaygaaga*

## LUQADDA INGIRIISKA FARSHAXANKA

### Akhrinta

- Sanadaha dugsiga dhexe, Ardayda waxay falanqeeyaan, qeexaan, isbarbar dhigayaan, oo ay qiimeeyaan fikradaha inta akhriska, qoraalka, hadalka, iyo dhageysiga.
- Ardayda waxay xirayaan buuga akhrinta hodanka ah, qoraalka heerka-fasalka heerka dhowr jeer usbuucii.
- Cutubyada waxaa loo habeeyey mowduucyo la xiriira iyo mowduucyo gacan ka geysanaya dhisidda aqoonta iyo isku xidhka fikradaha.
- Ardayda waxay soo qaadan doonaan cadeymo qaasa oo qoraal ah si ay ugu taageeraan fikradahooda qoraalka.
- Waxay dhisi doonaan aqoonta maadada iyada oo loo marayo akhrinta ballaaran ee qoraalka macluumaad.
- Ardayda ayaa adeegsan doona macnaha guud iyo qeybaha ereyada si loo go'aamiyo macnaha ereyada cusub ee ereyada.
- Waxay falanqeynayaan luqadda macnaha, iyo codka.

### Qoraal iyo Xiriir

- Ardayda waxay sameyn doonaan qaabab qoraal kala duwan oo ay kujiraan sheeko, war bixin, iyo dood.
- Ardaydu waxay si joogto ah u baari doonaan qoraalo badan iyo ilo kale si ay u dhisaan oo ay ugu gudbiyaan aqoonta mawduuca iyagoo qoraal ah ama hadlaya.
- Waxay isticmaali karaan su'aalaha cilmi baarista si ay u soo ururiyaan macluumaadka la xiriira waxayna u adeegsadaan macluumaadkaas si ay u taageeraan sheegashada.
- Ardayda ayaa ka baaraandegi doona waxbarashadooda iyaga oo u maraya koox yar iyo wada-hadal.
- Waxay baarayaan aragtiyo kala duwan iyo aragtiyo mawduuc ka hadlaya iyada oo loo adeegsanayo qoraal iyo hadal.

## XISAAB

**MUDDADA 1:** SEPTEMBAR–JANAAYO

- Ardeydu waxay fidin doonaan fahamka hore ee saamiyada iyo halbeegyada si ay ugu daraan xiriirada saami qaybsiga ee u dhexeeya tirada.
- Ardayda way dalban doonaan sii ballaari fahamkaagii hore ee hawlgalladda jajabyada isku daridda, kala go'ynta, isku dhufashada iyo isu qeybinta tirooyinka caadiga ah.
- Ardayda ayaa ku dabiqi doona casharada horay ay u barteen ee lambarada taban iyo kuwa togan si ay u helaan jawaabta su'aalaha xisaabta erayada ah.

**MUDDADA 2:** FEBRAAYO–JUUN

- Ardayda waxay sii wadayaan hormarinta fahamkooda xiriirka saami iyo sababa saamiyeed.
- Ardeydu waxay ballaarin doonaan aqoonta joometeriga si ay ugu daraan xaqiiqooyinka ku saabsan xaglaha iyo fahamka bedka, mugga, iyo bedka dushiisa si loo xalliyo mashaakilaadka dhabta ah ee dunida.

## SAYNISKA

### Dhulka iyo Koonka

- Ardeydu waxay isticmaali doonaan moodallo si ay u fahmaan sida meesha uu dhulku kaga jiro nidaamkeena qoraxda u horseedo qaababka sida xilliyada iyo qorrax-madoobaadyada.
- Ardeydu waxay isticmaali doonaan xogta iyo moodooyinka si ay u sharxaan sida iyo sababta ay dhulka dushiisa isu beddesho waqti ka dib, oo ay ku jiraan tectonics plate, nabaad guurka, cimilada, iyo qaababka cimilada.
- Ardeydu waxay falanqeyn doonaan xogta si ay uga doodaan caddaynta ku saabsan sida ficillada aadanaha iyo tirada dadku u kordhiyaan saameynta nidaamyada Dhulka.

## Qaababka loola hadlo macallinka ilmahaaga

- Waa maxay ilmaheeyga heerkiisa aqrinta? Heerkaasi miyuu hooseeyaa, ama ka sareeyaa heerka fasalka? Waa maxay xirfadaha gaarka ah ee uu ka shaqeynaayo?
- Side buu ilmaheeyga u horumarinayaa heerka aqrinta, qoridda, ku hadalka iyo dhageysiga? Maxay tahay awoodiisa/deeda? Waa goobahee in kor loo qaado ah?

## Qaababka aad u taageeri karto ardaygaaga guriga

- Waqti u qoondee (20-30 daqiiqo) ee ilmahaaga uu ku aqriyo maalin kasta. Iyagga hakuu aqriyeen adiga. Kala hadal iyaga waxyaabaha ku saabsan wax ka dhacaaya buug(aagtooda).
- Weydii ardaygaaga inuu kula wadaago wax ay ka shaeynayaan fasalka dhexdiisa. Weydii iyaga su'aalaha sida, "Buugee ayaad aqrisaaa iyo/ama aad kaga hadashay fasalka maanta?" "Maxaad ku jeceshay wax yaabaha ku saabsan waxaad aqriso?" "Ii sheeg waxaad qortay eek u aabsan fasalka dhexdiisa maanta."
- Waqti u qoondeey (15-20 daqiiqo) ilmahaaga inuu ka shaqeeyo shaqadaguri ee ELA. Weydii iyaga su'aalahaan oo kale, "waa maxay shaqaddaada guri caawa?" "Sidee bay shaqddaada guri ula xiriirtaa barashaddaada maanta, ama side bay kuu diyaarineysaa berito?"

## Qaababka loola hadlo macallinka ilmahaaga

- Maxay tahay horusocodka ilmaheyga ee heerarka muhiimka ah?
- Waa maxay illaha ugu wanaagsan aan isticmaali karo si aan ugu taageero ilmaheyga guriga?
- Maxay yihiin ilamheyga awoodihiisa iyo daciifnimadiisa?

## Qaababka aad u taageeri karto ardaygaaga guriga

- Weydii ilmahaaga waxa ay ku barteen maanta dugsiga weydiina inay ku tusaan tusaale.
- Muddadda hore, ilmahaaga wuxuu bartay sida loo ciyaaro Ciyaarta Tirsiga. Weydii iyaga si aad u ogaato qiimaha maqan ee karaka hoose haddii wadarta la midka ah tahay 0. Iyaga hakuu sharaxaan sida ay iyga u go'aamiyeen qiimaha maqan.




- Haddii uu ilmahaaga ku dhibtoodo aragti xisaab qaas ah, u noqo dhiirigeliyahooda! Ahaw taageere kuna dhiiri geli ilmahaaga inuu sii waddo. Way ku wanaagsanaan KARAAN xisaabta!
- Marka aad adeeganeyso ama aad bannanka wax ku soo cuneyso, weydii ilmahaaga inuu qiimeeyo iibinta ama faa'idada.

## WAXBARASHADA BULSHADA

### Taariikhda Waqooyi galbeed Basiifiga

- Ardayda ayaa qiimeeya gobalka Washington, lagasoo bilaabo sabanadii dadkii asaliyiinta ah iyo imaatinkii reer Yurub ilaa maanta. Daraasada gobalka Washington waxaa ku jira baarista dastuurka gobalka iyo heshiisyada muhiimka ah, ayna ku jiraan arimaha caanka ah iyo madax banaanida qabiilada. Ayadoo la adeegsanaayo daraasada dheeriga ah ee soo galootiga, khibradaha kaladuwan ee dhaqanka, iyo isdhexgalka aadanuhu la sameeyay bii'ada, ardayda ayaa yeelan doona fahanka adag ee fikradaha muhiimka ah iyo fikradaha madaniga ah, dhaqaalaha, juquraafiyada, iyo taariikhda. Ardeydu sidoo kale waxay ku dhaqmi doonaan halbeegyada wax-akhris-qoraalka markay isticmaalaan su'aalaha muhiimka ah iyo weydiinta si ay uga shaqeeyaan xirfadaha sida akhriska, qorista, iyo u fikirka sida taariikhyahan. Kooraskaani wuxuu buuxinayaa shuruudaha Taariikhda Gobolka Washington ee qalin-jabinta dugsiga sare.
- Ardeydu waxay tixgelin doonaan fikrado badan waxayna miisaami doonaan ansaxnimada fikradahaas iyagoo adeegsanaya falanqaynta caddaynta.
- Ardeydu waxay ka doodi doonaan arrin iyagoo isticmaalaya khudbado madani ah oo lagu taageeray ilo badan oo lagu kalsoonaan karo.
- Ardeydu waxay isticmaali doonaan caddayn si ay u caddeeyaan sheegashada.
- Ardeydu waxay falanqeyn doonaan sida dhaqdhaqaaqa bulshada, horumarka tignoolajiyada, iyo kooxaha dhaqanka iyo qowmiyadaha ay u qaabeeyeen taariikhda gobolka Washington.

## MIYUUSIKA

- Abuur garaacitaan fudud, melodic, iyo jumlado iswaafaqsan oo ku dhex jira foomamka AB iyo ABA kuwaas oo gudbinaya ujeeddo qeexan.
- U adeegso heerarka caadiga ah iyo / ama astaamaha halista ah iyo / ama duubista maqalka / fiidiyaha si aad u diiwaangeliso weedho fudud oo shaqsiyeed, garaadyo melodic ah, iyo fikrado muusig oo laba-gees leh.
- Qiimee shaqadooda, codsashada, shuruudaha macalinku bixiyo sida codsashada qaybaha muusikada la xushay, iyo adeegsiga ilaha dhawaaqa.
- Aqoonso oo dalbo shuruudaha macalinku bixiyo (Sida tarjumida saxda ah ee fikirka, saxsanaanta farsamada, asalnimada, iyo xiisaha) si loo tababbarayo, loo nadiifiyo, loona go'aamiyo goorta ay diyaar u tahay wax qabashada.
- Hayso ikhtiyaarro aad kaga qaybgasho kooxda fanaaniinta, orchestra, iyo choir.

## CAAFIMAADKA & P.E.

- Dabakh xirfadaha, fikradaha, mabaadii'da, iyo istaraatiijiyooyinka la xiriira Howlaha dhaqdhaqaaqa.
- Ardayda waxay aqoonsanayaan qiimaha waxqabad jireedka caafimaadka, ku raaxeysiga, wajahaadda, ismuujinta, iyo isdhexgalka bulshada bilaabaayana u ololeynta shaqi ahaan iyo caafimaadka qoyska.
- Helitaanka macluumaad caafimaad oo sax ah oo isticmaalaya xirfadaha isgaadhsiinta iyo xirfadaha go'aan qaadashada si loogu doodo caafimaadkooda.

## XIRFADDAHA CASRIGA

- Waxay la shaqeynayaan had iyo jeer laxiriirayan iyagoo isticmaalaaya wadaagid dukumentiyo iyo/ama Wikis.
- Waxay isticmaalayaan khariiradaha casriga si ay u soo saaraan fahmid dhaqameed.
- Waxay xulanayaan qorshooyinka ku haboon sida loo abuuro wax soo saar warbaahin badan.

## DAREEN & BULSHO *fasalladda 7 qorsho diyaarinnadda*

- Qof weynimo ayaa bilaabaneysay inay ku soo if baxdao
- Awood u leh is wacyi gelin, aragti, iyo faham
- Daacadnimo iyo dib u dhigasho la'aan; u muuqda inuu dareemo badbaadsanaan
- In ka badan daryeela aragtiyooyinka fiirinta macallimiinta iyo waalidka/illaadadda
- Wuxuu bilaabi doonaa waxqabadyadooda tusmeyn dad waaweyn la'aan
- Aad ugu mahadceliya macallimiinta kuwa dhageysta uguna warceliya codsiyadooda isbedeladda dabciyada, marka xaqiiqda
- Tayooyinka hogaamiyenimo ee sii kordhaaya; u baahan fursado waxqaabadyo, sida meerinta da' isdhaafsan, shaqooyinka dugsiga, adeegga bulshada, iwm.
- U baahan inuu la kulmo dad muhiim ah, oo ka baxsan macallimiinta iyo waalidiinta, kuwasoo dhageysanaaya iyaga kana fekeraaya arrimo xasaasi ah ama kuwo kale ay ku wajahayaan

## U HEELANAANTEENA ARDAYDA IYO QOYSASKA

Dhammaan ardayda si waanaagsan ayay wax u baranayaan markay la kulmaan jir ahaan iyo dareen badbaadsan fasalka dhexdiisa iyo duggsiga. Ardayda iyo qoysaska waa inay fishaan inay arkaan ficilladda dadka waaweyn ee soo socda:

- Waxay helaayaan deegaan soo dhaweyn si loogu taageero dhisidda kalsoonidda, dhiirigelinta xiriirka dhammaan qoyaska.
- Mudnaanta la siin doonaa codka ardayda iyo ka qeybqaadashadda barashada iyo dhaqanka fasalka dhexdiisa.
- Barrida fahamka ay ku xaqiijinayaan ardayda inay lahaadaan filasho aad u sareysa ee taageeridda casharro si ay ugu koraan garaad ahaan.
- Diird saaridda xiriirka ardayda si loogu dhiirigeliyo ka barashada iyo caawinaada kuwa kale.
- Fulinta taageeridda Ku Luglahaanta & Dabciga Wanaagsan ee Wanaaga Baaxadda-Dugsiga sidaas awgeeda dhammaan ardayda iyo dadka waaweyn ee halkaasi ku nool wadaagaan ficilladda iyo waxay aaminsanyihiin ee dugsiga ka dhigaaya goob badbaadsan si degenna wax loogu barto.

## SU'AAL IYO JAWAAB

**S:** *Sideen ku taageeraa ilmahayga si uu iskuugu diyaariyo dugsiga sare?*

**J:** Waxaad dib u eegi kartaa warqada koorsoooyinka si aad wax ugu fahanto koorsooyinka looga baahan yahay shaqada ka danbeesa kuleeja iyo dugsiga sare. Waxaad sidookale xaadiri kartaa habeenada Qorshaynta Dugsiga Sare ee la qabto guga.

**S:** *Sideen marwaliba ulla socon karaa horumarka ku saabsan ilmaheyga ee fasal kasta isaga ama iyadda qaadato?*

**J:** ParentVue wuxuu kuu ogolaanayaa inaad dhamaan aragto casharradda ilmahaaga, cahr-hawleedka wixiisa ama waxeeda, iyo dhibcooyinka hadda. Haddii aad ka walaacsan tahay arrimo la xiriira dhibcooyinka ilmahaaga, marka hore, weydii ilmahaaga inuu la hadlo macallinkiisa/keeda ee fasalkaasi. Ilmahaaga waa inuu weydiiyaa muxuu sameyn karaa/kartaa si uuu horumariyo dhibcaha u sameyana qorsho sidaas lagu sameeyo. Haddii aad wei ka walaacsan tahay, si toos ah ula xiriir ilmahaaga macallinkiisa si aad u aragto sida aad u taageri karto ilmahaaga ku guuleysashada fasalkaas.

# U DIYAAR GARAWGA *mehrad & kulliyad*

## *deeqda waxbarasho ee* KULLIYAD U GUDBIDDA

Deeqda-waxbarasho ee Soohdinta Koleejku waa ballan-qaad hore oo ah kaalmada maaliyadeed ee gobolka ee ardayda xaqa u leh ee iska diiwaangeliya dugsiga dhexe oo buuxiya shuruudaha ballan-qaadka. Deeqda-waxbarasho ee Ku-xirnaashaha Kuleejyada waxay dabooshaa celceliska kharashka waxbarashada ee qiimaha kulliyadda dadweynaha, kharashyada qaar, iyo gunnada buug yar oo ka badan 65 kuleej, jaamacado, iyo dugsiyo farsamo ee Washington.

Ardayda buuxiya mid ka mid ah shuruudaha soo socda ayaa si otomaatig ah loogu diiwaangeliyaa Bound College:

- Ardayda ku jira dugsiga dadweynaha oo u qalma qadada qiimaha-lacag la'aanta iyo dhimista 7-aad, 8-aad, ama kuwa dhowaan u qalma fasalka 9-aad.
- Ardayda ku jirta daryeelka korinta ee gobolka, ama ku tiirsan gobolka inta u dhaxaysa fasalka 7aad iyo qalinjabinta dugsiga sare.

**NIDAAMYADA KALE EE AAD UGU QALANTO**

Ardayda qaar ayaan ku haboonayn labada xaaladood laakiin waxay xiisaynayaan inay codsadaan Koleejka Bound. Ardayda iyo qoysasku waxay la xiriiri karaan barnaamijka Soohdinta Koleejka si ay u codsadaan haddii ay buuxiyaan mid ka mid ah shuruudahan soo socda:

- Ka qaybgal dugsi gaar ah ama barnaamijka guriga ee Gobolka Washington oo buuxi shuruudaha dakhliga.
- Ku jiraan nooc kale oo ah daryeelka korinta oo aan u qalmin qado qiimo jaban oo bilaash ah.

Si aad u hesho sjadwal sanad dugsiyeedka dagmada booqo ***www.fwps.org/schoolcalendar***



## XAADIRSANAANTA

MAALIN KASTA WAY TIRSANTAHAY
ARDAY KASTA WAA MUHIIM

Ardayda kuwa suga xaadirsanaan wanaagsan dhammaan sannad dugsiyeedka oo idile:

- Waxay helaayaan dhibco heer caadi ah ee xaddiga ugu sareeya
- Ka qallin jibinayaan dugsiga sare xaddiga ugu sareeya
- Lahaanayaan dabci wanaagsan kaasoo ku biirinaaya ku guuleysashada dugsiga dhexdiisa iyo mehrado mustaqbalka

Maqnaanshaha arday ee hal maalin waa waa maqnaansho iskucelcelin loo qaadaayo seddex maalmood inuu ku gaaro.

## DABCIGA iyo BARASHADA XAMAASADA BULSHAD

Ujeedada ka dambeysa Kahortaga Dhaqanka iyo Jawaab-celinta Habdhaqan Suuban (CR-PBIS) waa in dugsiyada laga dhigo mid waxtar, hufnaan leh, iyo jawi waxbarasho oo loo wada siman yahay dhammaan aqoonyahannada. Adoo baraya aqoon yahanada iyo qirashada akhlaaqda wanaagsan, dadka waaweyni waxay kordhiyaan saadaalinta, isku xirnaanta, jawiga wanaagsan, iyo amaanka dhamaan iskuulka. Casharrada barashada shucuurta bulshada waxaa la dhigaa oo lagu dhejiyaa sanad dugsiyeedka oo dhan. Si aad waxbadan uga barato CR-PBIS iyo barashada cilmiga bulshada ee RP ee iskuulkaaga, kala xiriir macalinkaaga aqoonyahanka ama maamulaha.

## QORSHA DUGSIGA SARE IYO KASHISHE/KADIB

Arday waa in bilaabaan jeexida khariirad qorshahooda dugsiga Sare iyo kashishe oo ay raadiyaan koorsooyinka ay tahay in qaataan oo kuhogaaminaya qorshohooda gaarkaa ee waxbarshada kadamdambeysa dugsiga sare, tababaro iyo kulliyad. Tusaha heerka fasalka ee dugsiga sare iyo kadib/kashishe waxaa laga heli karaa www.fwps.org/CCR. Ardaydu waxay kaloo isticmaali karaan barta ay intarneetka kuleeyihiin ee ah www.MaiaLearning.com si ay kuqorsheystaan oo ku waxbadana ogaadaan ayagooisticmaalayo sahano xiisaleh,agabka baaritaanka qorshaha tacliinta iyo deeq waxbarasho, kulliyad iyo mehrad.tag MaiaLearning.com dooro kugal google kadibna isticmaal bartaada "p12 gmail" iyo furasireedka.

## SOO BANDHIGIDDA CASHARRADA

- **FASALLADDA 10–12** ▶ Gudbidda iyo casharadda sareeya (AP, IB, CAMBRIDGE)
- **FASALKA 9** ▶ Gudbidda fasalka 9 casharro helaaya 6 la aqoon sanyahay
- **FASALLADDA 8-9** ▶ Gudbidda Aljebra 1
- **FASALLADDA 6–7** ▶ Gudbidda ELA iyo casharadda xisaabta
- **FASALKA 3** ▶ Aqrinta heer fasal
- **FASALLADDA K-2** ▶ Barashada sida loo aqriyo